FSAU
Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Soomaaliya

War Saxaafadeed

Waxa la soo saaray 31ka Bisha 1aad ee 2008

In ka badan rubuc ama afartii meeloodba hal Dadweynaha Soomaaliya waxay ku jiraan Xiisad Bina-aadamnimo

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbaxaya

Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Soomaaliya (FAO/FSAU) iyo FEWS NET Soomaaliya waxay xaqiijinayaan In xaaladda guud ee bina-aadamnimada ee Soomaaliya ay ka sii dartay lixdii bilood ee la soo dhaafay. Dad ay tiradoodu u dhaxayso **1.8** iyo **2 malyuun oo qof, oo ay ku jiraan illaa hal malyuun oo ah dad barakacay, ayaa lagu qiyaasay inay u baahanyihiin gargaar bina-aadamnimo iyo taageero hab-nololeedka ah ugu yaraan lixda bilood ee soo socda**. Xaaladda hubinta cuntada iyo nafaqadu hore ayay u martay dadwynaha deggan dhulka miyiga ah ee gobollada koonfurta ee Jubbooyinka iyo Gedo oo hore ay dhibaatooyin u gaysteen abaarihii heerka gobol ahaa ee dhacay 2005/6. Hase yeeshee, lixdii bilood ee la soo dhaafay xaaladda bina-aadamnimadu way sii xumaatay gobollada Shabeellooyinka, Hiiraan iyo gobollada Dhexe sababtoo ah tirada dadka ka soo barakacay Muqdisho oo aad u korodhay iyo abaar sii qoto dheeraanaysa oo ka jirta gobollada Hiiraan iyo dhexe. Waxa intaas dheer, sicir barar aad u sarreeya oo qiimaha cuntada gudaha iyo ta dibeddaba ah oo ka jira dhammaan dalka oo abuuraya dhibaatooyin la xidhiidha fursad u helidda cuntada ee dadka deggan magaalooyinka siiba kuwa saboolka ah.

1. Dumarka waxa khasab ku ah inay biyaha ka soo dhaamiyaan goobo aan badbaado lahayn iyadoo ay yaryihiin goobaha biyaha laga helo ee habaysani. Biyaha ay teyadoodu lidataa waxa weeye sababta ugu weyn ee keenta shubanka oo xidhiidh weyn la leh heerarka sare ee nafaqa-darrada ee ka jira Soomaaliya (sawirkan waxa laga soo qaaday Xuddur, Bakool bishii 11aad ee 07).

2. Berkad madhan oo qalalan, taasoo keentay in biyadhaamis qaali ahi uu sii socdo (sawirkan waxa laga soo qaaday Ceelbuur, Galgaduud, bishii 12aad ee '07)

Natiijooyinkaasi waxay ku salaysanyihiin qiimayn xilliga Deyrta 2007/08 ah oo dhamaystiran oo dalka oo dhan ay ka samaysay FSAU, oo ay wehliyaan FEWS NET Soomaaliya, iyo 45 hay'adood oo kale oo ka kala tirsan Jimciyadda Quruumaha ka Dhaxaysa, ururrada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah iyo kuwa gudaha iyo maamuladda dawladda ee gudaha. Qiimayntan waxa lagu ogaaday in wadarta tirada dadka u baahan taageero bina-aadamnimo iyo mid hab-nololeedka ahi ay tahay qiyaastii **850,000** oo qof oo ku nool dhulka miyiga ah oo ay **soo food saareen xaalado ah Gurmad Bina-aadamnimo ama Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun**, iyadoo qiyaastii **700,000 oo qof ay si cusub uga soo barakaceen magaalada Muqdisho** (taniyo bishii 3aad ee 2007), iyo illaa **275,000** oo qof oo ah dad muddo dheer barakacsanaa.

Lixdii bilood ee la soo dhaafay, **tirada dadka ka qaxay Muqdisho waxay ahayd laban laab iyadoo ka kacday 325,000 bishii 8aad ee 2007, oo gaadhay ka badan 700,000**. Badi, ama 82%, dadkaas cusub ee barakacay waxay ku uruureen gobollada horeba ay u soo foodsaareen dhibaatooyinka ugu daran dalka ee la xidhiidha furusad u helidda cuntada, hab-nololeedyada baabay iyo heerar nafaqa-darro oo gurmad ah (Shabeellooyinka, Hiiraan iyo gobollada dhexe). Waxa intaas dheer taageerada bulshada ee ka imanaysa bulshooyinka martida loo yahay way koobantahay, fursad u helidda dakhliga ee dadka barkacay way xaddiddantahay, iyadoo isla markaana ay soo foodsaartay in qiimaha cuntada gudaha iyo ta dibedda laga keenaa uu gaadhay heerkii ugu sarreeyey ee la diiwaangeliyey. Baadhitannada nafaqadu waxa ay iyana xaqiijinayaan in dadka sannadaha badan barakacsanaa ay u baahanyihiin gargaar degdeg ah maaddama xaaladooda nafaqadu ay ka sarrayso heerka caalamiga ah ee la aqbali karo ee gurmadka.

Qiyaastii **155,000 oo qof oo xoola-dhaqato ah oo jooga gobollada dhexe** iyo **70,000 oo kale oo beeralay iyo beero-iyo-xoola-dhaqato ah oo jooga gobolka Hiiraan** waxa soo foodsaartay xaalad degdeg u sii xumaanaysaa waxana ay u baahanyihiin gargaar bina-aadamnimo oo degdeg ah ama taageero hab-nololeedka ah. Xiisadda haddu waxay xaqiijinaysaa digniino hore oo ay FSAU/FEWSNET bixiyeen bishii 12aad ee 2007 (Warbixinta Hubinta Cuntada iyo Nafaqada ee FSAU, 21ka bisha 12aad ee 07) oo ku saabsanayd in xaaladda hubinta cuntada iyo nafaqado ay sii xumaanayso kadib laba xilli oo roobabku ay liiteen oo keenay in lagu guulaysan waayay midhaha, iyo in xaaladaha daaqu ay liiteen, biyuhuna ay yaraadeen. Xoola-dhaqatada Galgaduud iyo koonfurta Mudug fursadaha ay xoolahooda kula guuri karaan way koobanyihiin nabad la'aanta darteed waxana khasab ku noqotay inay ku wadaan inay lacag qaali ah biyo ugu iibiyaan xoolahooda xilliga Jiilaalka. Waxa intaas raaca, qiimaha dalagga iyo badeecadda kale wuxuu gaadhay heerkii ugu sarreeyey ee la diiwaangeliyey waxana uu ku wadaa inuu sii kordhayo, iyadoo qaska ku yimi ganacsigu uu abuurayo in helitaanka badeecaddu uu yaryahay. Waxa intaas dheer, bulshooyinka uu culayska badani saaranyahay ee goobahaasi waxa kale oo marti u ah tirada labaad ee ugu badan ee dadka cusub ee ka soo qaxay Muqdisho (32% ee wadarta dadka cusub ee soo barakacay ama 224,000 oo qof).

"Gobollada Shabeellooyinku weli waxay yihiin gobollada sida ugu xun ay u saamaysay xiisadda hadda ee bina-aadamnimadu", ayay tidhi Cindy Holleman, La taliyaha Sare ee UN FAO u qaabilsan FSAU. Iyadoo ku sii wadday hadalkeeda inay tidhi "in ka badan **325,000** oo ah beeralay iyo beera-iyo-xoola-dhaqato ayaa ku jira xaalado ah **Gurmad Bina-aadamnimo** ama **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u xun. Gobolladaasi waxa mari tu ah tirada ugu badan ee dadka cusub ee ka soo barakacay Muqdisho oo wadartoodu ay tahay in ka badan 367,000 oo qofi".** Inkastoo ay jiri doonto in bulshooyinka qaar ay dhibaatadu ka fudaado si kooban ama ku meel gaadh ah soosaarka dalagga roobabka ku baxa oo wanaagsan dartiis, haddana guud ahaan wadarta soosaarka dalagga xilliga Deyrta '07/08 ee labadaas gobol aad ayuu caadi uga hooseeyaa (51% iyo 66% Celceliska Dagaalka Kadib ee gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe), waana xilligii saddexaad ee uu soosaarka gallaydu ka hooseeyo caadi (39% Celceliska Dagaalka Kadib), iyo kii labaad ee ugu hooseeyey soosaarka dalagga ee sannadkii, muddo toban sano ah. Xaaladda nafaqadu weli waxa weeye halis iyadoo heerarka nafaqa-darrada guud (GAM) ay ka sarreeyaan heerka gurmadka ee la aqbali karo. Colaadda sii socota iyo sicir bararkuna labada bilood ee soo socda waxay keeni karaan in xiisadda jirtaa ay sii xumaato.

Si aad u hesho war dheeraad ah eeg websaytyadan: www.fsausomali.org; www.fews.net ama la soo xidhiidh FSAU: fsauinfo@fsau.or.ke

Cinwaanka:
FSAU - Somalia
Kalson Towers,
Parklands
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
Tilifoonka:
+254 20 374 5734
Faakiska:
+254 20 374 0598
Email:
fsauinfo@fsau.or.ke
www.fsausomali.org

Technical & Managerial Support
European Commision
USAID
Funding Agencies
Sida
FEWS NET
unicef
UNHCR
Technical Partners

Falanqaynta Xaaladda Hubinta Cuntada ee Soomaaliya: Saadaasha Deyrta '07/08 Kadib, Bisha 1aad – Bisha 6aad ee 2008



Falanqaynta Xaaladda Hubinta Cuntada ee Soomaaliya : Tirada Dadweynaha ee Deyrta '07/08 Kadib Bisha 1aad - Bisha 6aad ee 2008

Gobollada Saamoobay	Wadarta Dadwynaha ee UNDP 2005[1]	Qiyaasta la qiimeeyey Iyo ta ku meelgaadhka ah ee dadweynaha ku jira XCHAX iyo GB		
		Xiisad Cuntada & Hab-nololeed-ka ah oo aad u xun (XCHAX)	Gurmad Bina-aadamnimo (GB)	Wadarta ku jira XCHAX ama GB oo ah % Dadwey-naha Gobolka
Waqooyi[1]	**2,341,718**	0	0	0
Dhexe				
Galgadud	330,057	80,000	15,000	29
Mudug	350,099	35,000	5,000	11
Isku –darka (Gobollada Dhexe)	**680,156**	**115,000**	**20,000**	**20**
Koonfur				
Bakool	310,627	90,000	5,000	31
Baay	620,562	25,000	0	4
Gedo	328,378	35,000	10,000	14
Hiiraan	329,811	65,000	25,000	27
Jubbada Dhexe	238,877	20,000	0	8
Jubbada Hoose	385,790	60,000	15,000	19
Shabeellada Dhexe	514,901	40,000	85,000	24
Shabeellada Hoose	850,651	85,000	155,000	28
Isku-darka (Koonfurta)	**3,579,597**	**420,000**	**295,000**	**20**
Banaadir	**901,183**			
WADARTA GUUD	**7,502,654**	**535,000**	**315,000**	**11**

Qiyaasta la qiimeeyey & ta ku meelgaadhka ah ee dadweynaha jooga **dhulka Miyiga ah** ee ku jira XCHAX ama GB	**850,000**	**11**
Qiyaasta Tirada Dadka Cusub ee Barakacay oo la cusboonaysiiyey bisha 1aad ee 2008	**705,000**	**9**
Qiyaasta Tirada Dadka Waayeelka ah ee Barakacay	**275,000**	**4**
Qiyaasta Wadarta Dadka Barakacay ee ay Xiisadi haysato	**1,830,000**	**24**